

Ururinta Xogta REALD iyo COVID-19

Waa maxay REALD?

REALD waxay u taagan tahay jinsiga, qowmiyadda, luqadda, iyo naafanimada. Sharciga Oregon wuxuu hadda daryeel bixiyayaasha caafimaadka farayaa in ay bukaanka weydiyaan macluumaadka REALD marka la joogo booqashooyinka daryeelka caafimaadka ee la xiriira COVID-19. Ka dibna waxay macluumaadkan la wadaagaan Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA).

Shuruudan ayaa ku caawinaysa gobolka in uu fahmo cidda uu saameynta ugu badan ku yeeshay COVID-19, si uu markaa si fiican wax ugu maalgelin karo uguna adeegi karo bulshooyinkaasi. OHA waxay la shaqaysay bulshooyinka midabyada kala duwan ee Oregon markii la dejinayay shuruudani.

Sababta aan u weydiinayno

Jawaabaha ku saabsan su'aalaha REALD waxay mas'uuliyiinta caafimaadka bulshada ka caawin doonaan in ay fahmaan cidda ay saameynta ugu badan ku yeeshen cudurada sida COVID-19, si ay u qorsheyn karaan sida wanaagsan ee loo caawiyo bulshooyinkaasi. Tusaale, haddii aanu ogaano in koox dad ah ay qabto kiisaska COVID-19 marka loo eego kooxaha kale, gobolku wuxuu xaqiijin karaa in kooxdaasi hesho baaritaan iyo ilo dheeraad ah sida maaskaraha.

Adiga ayaa go'aan ka gaari kara

Adiga ayay kugu xiran tahay in aad ka jawaabto su'aalaha REALD. Iyada oo daryeel bixiyahaaga looga baahan yahay in uu ku weydiyo su'aalaha REALD oo dhan, lagaagama baahna in aad ka wada jawaabto dhammaantood. Su'aalaha aadan rabin in aad ka jawaabto, waxaad dooran kartaa "Ma rabo in aan ka Jawaabo." OHA waxay rajeynaysaa in aad ka jawaabi doonto su'aalaha oo dhan, si ay si fiican ugu adeegi karaan adiga iyo dadka reer Oregon.

Sidee baad u ilaalin doontaan waxyaabaha ii gaarka ah?

Waxaanu rabnaa in qof walbaa dareemo ammaan ka jawaabista su'aalaha REALD. Macluumaadkaagu waa kuwo si adag qarsoodi u ah waxaana loola dhaqmi doonaa in uu yahay diiwaanka caafimaadka dadweynaha oo qarsoodi ah. OHA ma soo raaciso macluumaadka shakhsi ahaaneed, sida magaca ama taariikhda dhalasho, marka ay macluumaad u soo sheegayso hay'adaha federaalka sida Xarumaha la Dagaalanka iyo ka Hortagga Cudurka.

Xogta REALD iyo faa'iidooyinka gobolkaaga

La wadaagista aad xogtaada REALD nala wadaagayso saameyn kuma yeelan doonto wixii faa'iidooyin ah ee aad ka hesho gobolka, sida SNAP ama Qorshaha Caafimaadka Oregon/CAWEM. Tani waxay ka dhigan tahay in aanan macluumaadkaaga lala wadaagi doonin hay'adaha kale, oo ay ku jiraan mas'uuliyiinta laanta socdaalka.



Office of
Equity & Inclusion

Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan
REALD bit.ly/oha-reald

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Sinnaanshaha iyo Ka mid noqoshada kala xiriir 1-844-882-7889 ama email u dir OHAREALD.Questions@dhsosha.state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

OHA 3585 Somali (3/21)